

Alaabaha u dhiganta ama u dhow dawada (Läkemedelsnära)

Bakhaarka xafiiska adeega macaamiisha ee bakhaarka Skövde (Skövdedepån)

Fadlan ka dalbo alaabaha u dhow dawada adeega elektaroniga ee 1177 Vårdguiden (e-tjänsten i 1177 Vårdguiden). Alaabahaas waxaa ka mid ah alaabta kaalmada cudurada macaanka, nafaqada iyo alaabaha stomi-ga (stomi waa bac lagu xidho caloosha si loogu ururiyo saxarada, marka qofka laga qalo walamdka isla markaana qaybta saxarada ee walamadka loo soo wareejiyo caloosha, si uu qofku halkaa uga saxaroodo). Marka la dalbanayo tuumbada lagu xidho stomi-ga (trakeostomi) waxaa loo baahanyahay in la isticmaalo foomka dalabka ee ku jira bogga internetka.

Waxaa kala oo aad xitaa ka dalban kartaa qalabka macaanka, xafaayadaha, stomi-ga iyo tuumbada stomi-ga (trakeostomiprodukter) bakhaarka xafiiska adeega macaamiisaha ee Skövdedepån.

Wakhtiyada ay furantahay Isniin-jimce 08:00 – 16:30

Waktiga xidhida qadada 12:00 – 12:30

Lambarka telefoonka 010 – 441 31 90

Wakhtiga soo gaadhsiinta

Muddada ay qaadaneysa in lagu soo gaadhsiiyo dalabka alaabtayada u dhiganata ama u dhow dawada waa sidan hoos ku xusan:

- Alaabaha kaalamada cudurka macaanka, nafaqooyinka, xafaayadaha iyo stomi-ga waxaa ay qaadataa shan (5) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Tuumbada stomi-ga (trakeostomiprodukter) waxaa ay qaadataa todoba (7) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Alaabaha bilaa gluten-ka ah waxaa ay qaadataa toban (10) maalmood oo maalmaha shaqada ah.
- Alaabha loo haysto ruqsad waxaa ay qaadataa tobam (10) maalmood oo maalmaha shaqada ah.

Alaabaha ruqsada gaarka ah loo haysto waa alaabo aan ku jirin heshiiska alaabaha lagu heshiiyey in la kala iibsado. Badeecada ama alaabaha noocaas oo kale ahi ma yaalaan bakhaarada qaybiyaasha, waxaa ay markaas taas macnaheedu tahay in wakhtiga soo gaadhsiintu uu ka dheeraado wakhtiga caadiga ah.